# ISBAHAYSIGA DEGMADA SAN DIEGO
# WARBIXINTA WAXQABADKA IYO QIIMEYNTA SANADLAHA AH EE LA ISKU DARAY 2024-25
# DEEQDA HORUMARINTA BULSHADA, ISKAASHIYADA MAALGASHIGA GURYAHA, FURSADAHA GURYAHA EE SHAKHSIYAADKA QABA BARNAAMIJYADA DEEQDA XALLINTA XAALADAHA DEGDEGGA AH IYO AIDS

Waxaa halkan lagu bixinayaa ogeysiis ah in Hay'adda Adeegyada Aadanaha iyo Caafimaadka ee Degmada San Diego, Hay'adda Adeegyada Hormarinta Bulshada iyo Guriyaynta ay ku casuumayaan dadwaynaha in ay dib u eegis ku sameeyaan oo ay faallooyin ka bixiyaan Warbixinta Qiimaynta iyo Waxqabadka Sanadlaha ah ee La Isku Daray (CAPER) ee Sannad-maaliyadeedka (FY) 2024-25.

Sannad kasta, degmadu waa in ay soo gudbisaa CAPER oo qeexaya waxqabadyada barnaamijka intii lagu jiray sanad maaliyadeedkii hore, waxqabadyadaas oo la xiriira Deeqaha Horumarinta Bulshada (CDBG), Iskaashatada Maalgashiga Guryaha (HOME), Deeqaha Xallinta Xaaladaha Degdegga ah (ESG), iyo Fursadaha Guryaha ee Shakhsiyaadka qaba barnaamijyada AIDS-ka (HOPWA). Barnaamijyada CDBG iyo ESG waxay maalgaliyaan guriyeynta, horumarinta bulshada, iyo adeegyada iyo waxqabadyada Degmada Magaalooyinka ah ee ka kooban aagga aan la wadaagin, iyo sidoo kale lix magaalo oo ka qaybqaata barnaamijyada ee kala ah Coronado, Del Mar, Imperial Beach, Lemon Grove, Poway, iyo Solana Beach. Barnaamijka HOME ee Degmada San Diego wuxuu bixiyaa lacag/deeq loogu talagalay hawlaha guriyeynta ee Isbaheysiga HOME oo ay ku jirto Magaalooyinka Degmada, iyo sidoo kale lixda magaalo ee ka qaybqaadanaya barnaamijka ee kala ah Carlsbad, Encinitas, La Mesa, San Marcos, Santee, iyo Vista. Barnaamijka HOPWA wuxuu bixiyaa maalgelin loogu talagalay guryaha iyo adeegyada la xiriira guryaha ee loogu talagalay dadka la nool cudurka HIV/AIDS iyo qoysaskooda ee dhamaan gobolka San Diego.

Dadweynaha waxay bixin karaan faallooyin qoraal ah inta lagu jiro xilliga faallooyinka ee 15-ka maalmood ah ee dhammaanaya Sebtembar 22, 2025. CAPER waxaa khadka looga geli karaa halkaan www.sdhcd.com.

Faallooyinka qoraalka ah waa in boosto ahaan ama iimayl ahaan loogu gudbiyaa Hay'ada Adeegyada Guriyeynta iyo Horumarinta Bulshada, Qaybta Horumarinta Bulshada, 3989 Ruffin Road, San Diego, CA 92123, ama waa in iimayl ahaan loogu diraa: Community.Development@sdcounty.ca.gov.